

## SHARCIGA BOOQASHAYASHA EE COVID – 19

Inagoo u gudbi doona wajiga cusub ee lanoolaanshaha Covid-19 dugsiga Cotham wuxuu sii wadayaa taxadaro dhawr ah taasoo aanu rajeyneyno inaanu ku yarayno fidida Covid-19 ka si aanu u ilaalino daryeelka caafimaad ee shaqaalahayaga iyo booqashayaashaba. Fadlan raac codsigayagan markaad soo booqanayso dugsiga.

**Intaadan Iskoolka Iman Kahor:** Haddii ay dhacdo Covid-19 ku inuu ku soo kordho dugsiga dhexdiisa ama agagaarkiisaba anagoo raacayna hogaanga caafimaadka bulshada waxaa dhici karta inaanu ku weydiino inaad iska soo baadho Covid-19 intaad guraiga joogto hadii loo baahdo arintaana waxaa kula soo socodsiinaya qofka aad balanta la leedahay kahor intaanad iman dugsiga. Haddii aad iska weydo xanuunka u imow balantaada, hadii kalase la soo tasho ruuxa aad balanta laleedahay.

Haddii lagu weydiyo oo aanad rabin inaad is baadho ma awoodeysid inaad ka soo qaybgasho kulankaagii ama dhacdooyinka dugsiga. Haddii aad xaaladaada lasoo socodsiiso qofka aad balanta laleedahay waxaa laga yaabaa inay kuugu bedelaan kulanka mid ka baxsan

**DABOOLISTA WEJIGA:** Haddii ay dhacdo Covid-19 ku inuu ku soo kordho dugsiga dhexdiisa ama agagaarkiisaba anagoo raacayna hogaanga caafimaadka bulshada waxaa dhici karta inaanu ku weydiino inaad soo xidhato aalada wejiga lagu daboolo intaanad imaan hadii aanad haysan waanu ku siin karnaaye sidaa ula soco.

**GACMO NADIIFIN:** Fadlan isticmaal dawada gacmaha lagu nadiifiyo ee lagu sii diyaariyey markaad dugsiga soo geleysid iyo markaad ka sii baxaysidba waxaadna ka helaya xafiiska aad ka soo gasho iyo meelo badan oo dugsiga mid ahba.

**ISDIWAANGELIN:** Waa muhiim haddii uu Covid-19ka dilaaco dugsiga lagana yaabo inuu saameyn kugu yeesho waa inaanu helno dhamaan faahfaahinta xidhiidhka lagama maaarmaanka ah si aanu kuula soo socodsiino ilaalinta caafimaad iyo bad baada'daada awgeed waxaanu ku weydiindoonaa inaad is diiwaan geliso markaad timaado dugsiga.

**KA QEYBGALAYAASHA KULANKA:** Kalya ruuxii uu oгаа qaban qaabiyaha kulakaaga ayuunbaa ka soo qeyb geli kara kulankan si loo xadido ama loo xakameeyo geermiska Covid-19 ka. Haddii aad u baahan tahay wheel fadlan la soo xidhiidh qaban qaabiyaha kulanka si aad talo uga hesho ha is odhanin wheel waad iska soo ka xaynsankartaa. Haddi ruux ku soo raaco waa inay raacaan dhamaan sharuudahan oo dhan.

**HADAAD XANUUNSANEYSO:** Waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo booqan dugsiga haddii adiga ama qofkale oo qoyskaaga ka mid ah ay muujinayaan calaamadaha Covid-19 ka ama ay muujinayeen 10kii maalmood ee u danbeeyay ka hor balantaada.

**BOOQASHADAADA KADIB:** Booqashadaada ka dib hadii aad isku aragto calaamadaha Coid-19ka 3 maalmood gudahood balantaada ka dib fadlan halkan ku soo dir iimeyl ( **info@cotham.bristol.sch.uk**) ama nambarkan (**0117 919 8000**) soo garaac tani waxy fursad noo siineysaa inaanu laxidhiidhno madaxda bulshada caafimaadka ee arintanu khusayso, dadkii adiga kula socday iyo shaqaalahayagaba, anagoo tixgelineyna waajibaadka ilaalinta caafimaadka iyo xogta dadweynahaba.

## **NADIIFINTA XAFIISKA IYO QIIMEYNTA KHATARTA**

Waxaanu dejinay talaabooyin iyo hababka soo socda si loo xaqiijiyo badbaadada ruux walba.

- Waxaanu weli si joogto ah u nadiifineynaa meelaha had iyo jeeraale aad loo isticmaalo ama gacmahu u badan yihiin gaar ahaan gacmaha albaabada, miisaska, qolalka lagu shiro iyo qalabka guud ee xafiiska.
- Waxaanu isticmaaleynaa wax jeermiska dila oo sida ceeryaamo ah oo lagu buufiyo meelaha fagaarayaasha, qololka kulamda iyo halka aad loo isticmaalo sida suuliyada. Crriyaamadani waxay siinaysaa ka hortaga jeermiska marka lagu isticmaalo nadaafada wanaagsan iyo nidaamka nadiifinta oo joogto ah, waxay kaloo ilaalisaa meelaha sar sare iyadoo ka qeybqaadaneysa badbaadada agagaarka dugsiga iya goobaha bulshada oo dhan.
- Waanu kuu helikarnaa waxa wejiga lagu daboolo adiga iyo booqashayaashaba hadii aad codsato.
- Iyadoo laraacayo sharciga ama hagitaanka dawlada waxaanu dhameystirnay talaabooyinka ka hortaga halista **COVID – 19** ee loobaahnaa waxaanuna sii wadynaa inaanu xiliwalba dib u eegna talaabooyinkan.

**Dugsiga Cotham wuu ku mahadsanyahay ka qayb qaadashadaada ama kaalmadaada ku saabsan ilaalinta naftaada iyo dhamaan bulshada dugsiga.**